South Country HEALTH ALLIANCE

## SeniorCare Complete (HMO D-SNP)
# Soo Koobidda Faa'iidooyinka 2026

Xubnaha gobolada: Brown, Dodge, Goodhue, Sibley,
Steele, Wabasha, iyo Waseca.

**Haddii su'aalo qabtid, fadlan wac Adeegyada Xubnaha wacitaanka** Waa Bilaash: **1-866-567-7242**, TTY users call **1-800-627-3529** or **711**.
Saacadaha Hawlgalku waa 8 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo, Isniin - Jimce *(Abriil - Sebtembar)*; 8 a.m. to 8 p.m., 7 maalmood toddobaadkii *(Oktoobar – Maarso)* Wicitaanka waa lacag la'aan. **Wixii macluumaad dheeraad ah**, booqo **www.mnscha.org.**

H2419_7324_M
Laga bilaawo janaayo 1, 2026 –Desembar 31, 2026

# NOTICE

**NO ENGLISH** **1-866-567-7242**

**TRS: 711**

ATTENTION: If you speak English, free language assistance services are available to you free of charge and without unnecessary delay. Additionally, appropriate auxiliary aids and services to provide information in accessible formats are available free of charge and in a timely manner. Please call the number above or speak to your provider. English

ማሳሰቢያ፡- አማርኛ ተናጋሪ ከሆኑ ፤ ነጻ የቋንቋ ድጋፍ አገልግሎቶች ካለምንም ክፍያ እና ካለአላስፈላጊ መዘግየት ማግኘት ይችላሉ። በተጨማሪም መረጃን በቀላሉ ለማግኘት በሚያስችል ቅርጸት ለማቅረብ ተገቢ የሆኑ የመስማት ድጋፍ እና አገልግሎቶች ከክፍያ ነጻ በሆነ እና ግዜውን በጠበቀ መልኩ ማግኘት ይችላሉ። እባክዎ ከላይ ባለው ቁጥር ይደውሉ ወይም አቅራቢዎን ያነጋግሩ። Amharic

**تنبيه:** نقدم لمتحدثي اللغة العربية خدمات مساعدة لغوية مجانية وفورية، بالإضافة إلى وسائل وخدمات مساعدة مناسبة، وبصيغة معلومات سهلة بدون تكلفة وبشكل سريع. يرجى التواصل على الرقم الموضح أعلاه أو مراجعة مقدم الخدمة المباشرة. Arabic

သတိပြုရန် – အကယ်၍ သင်သည် မြန်မာဘာသာစကား ပြောဆိုသူဖြစ်လျှင် အခမဲ့ ဘာသာစကားဆိုင်ရာ ပံ့ပိုးထောက်ပံ့ပေးမှု ဝန်ဆောင်မှုများအား မလိုအပ်သည့် နှောင့်နှေးကြန့်ကြာမှုများ မရှိစေဘဲ သင် အခမဲ့ ရရှိနိုင်မည် ဖြစ်သည်။ ထို့ပြင် အချက်အလက်များအား အလွယ်တကူ ဝင်ရောက်ရယူနိုင်စေသော ဖောမတ်ပုံစံများဖြင့် ထောက်ပံ့ပေးထားသည့် သက်ဆိုင်ရာ ဖြည့်စွက် ထောက်ပံ့မှုများနှင့် ဝန်ဆောင်မှုများကိုလည်း အခမဲ့၊ အချိန်မီ ရရှိနိုင်စေရန် စီမံပေးထားပါသည်။ ကျေးဇူးပြု၍ အထက်ဖော်ပြပါ ဖုန်းနံပါတ်သို့ ခေါ်ဆိုပါ သို့မဟုတ် သင်၏ ထောက်ပံ့သူဖြင့် ပြောဆိုဆွေးနွေးပါ။ မြန်မာဘာသာစကား Burmese

យកចិត្តទុកដាក់៖ ប្រសិនបើអ្នកនិយាយភាសាខ្មែរ (ខ្មែរ) សេវាកម្មជំនួយភាសាឥតគិតថ្លៃមានផ្តល់ជូនអ្នកដោយមិនគិតថ្លៃ និងដោយគ្មានការពន្យារពេលមិនចាំបាច់ឡើយ។ លើសពីនេះ ជំនួយ និងសេវាកម្មដែលសមស្របក្នុងការផ្តល់ព័ត៌មានក្នុងទម្រង់ដែលអាចចូលប្រើបានគឺអាចរកបានដោយឥតគិតថ្លៃ និងទាន់ពេលវេលា។ សូមហៅទូរសព្ទទៅលេខខាងលើ ឬនិយាយជាមួយអ្នកផ្តល់សេវារបស់អ្នក។ ភាសាខ្មែរ (ខ្មែរ) Cambodian (Khmer)

注意：如果您說簡體中文，您可以免費獲得語言協助服務，且不會有不必要的延誤。此外，還能免費及時獲取以無障礙格式提供資訊的適當輔助工具和服務。請撥打上面的電話號碼，或與您的服務提供商溝通。 Cantonese (Traditional Chinese)

ATTENTION : Si vous parlez français, des services d'assistance linguistique gratuits sont à votre disposition, sans frais et sans délai. En outre, des aides et services auxiliaires appropriés pouvant fournir des informations dans des formats accessibles sont disponibles gratuitement et rapidement. Veuillez appeler le numéro ci-dessus ou contacter votre fournisseur. French

CEEB TOOM: Yog koj hais lus Hmoob, muaj kev pab txhais lus dawb rau koj siv. Koj tsis tas them nqi thiab yuav tsis qeeb. Kuj muaj cuab yeej thiab kev pab los pab koj nyeem cov ntaub ntawv kom yooj yim nkag siab. Koj hu tau rau tus xov tooj saum toj no lossis nrog koj tus kws kho mob tham. Hmong

**NO ENGLISH** ☎ **1-866-567-7242**

**TRS: 711**

ဟ်သူဉ်ဟ်သး– နမ့ၢ်ကတိၤကညီကျိာ်အဃိ, နမၤန့ၢ် ကျိာ်တၢ်ဆီဉ်ထွဲမၤစၢၤ လၢတလၢာ်ဘူဉ်လၢာ်စ့ၤ ဒီးတအိဉ်ဒီး တၢ်မၤယံာ်မၤနီၢ်သးဘဉ်နှဉ်လီၤ. အါန့ၢ်အနှဉ်, တၢ်အိဉ်စ့ၢ်ကီးဒီး တၢ်မၤစၢၤတၢ်နၢ်ပၢ်ဒီး တၢ်မၤစၢၤတၢ်မၤတဖဉ် လၢကဟ့ဉ်တၢ်ဂ့ၢ်တၢ်ကျိၤ လၢပှၤအါဂၤနၢ်ပၢၢ်အီၤသ့ လၢတအိဉ်ဒီးအဘူးအလဲ ဒီးချူးဆၢချူးကတီၢ်နှဉ်လီၤ. ဝံသးစူၤ ကိးနီဉ်ဂံၢ်လၢထး မ့တမ့ၢ် တဲသကိးတၢ်ဒီး ပှၤလၢအဟ့ဉ်နၤတၢ်မၤစၢၤ တက့ၢ်. ကညီကျိာ် Karen

안내: 한국어를 사용하시는 분께는 언어 지원 서비스를 무료로, 지체 없이 제공해 드립니다. 또한, 정보 접근성을 위한 적절한 보조 기구 및 서비스가 무료로, 시의적절하게 제공됩니다. 위에 있는 번호로 전화하시거나 담당자에게 말씀해 주십시오. Korean

ໝາຍເຫດ: ຖ້າທ່ານເວົ້າພາສາລາວ, ທ່ານຈະໄດ້ຮັບບໍລິການຊ່ວຍເຫຼືອດ້ານພາສາໂດຍບໍ່ເສຍຄ່າ ແລະ ບໍ່ມີການຊັກຊ້າ ທີ່ບໍ່ຈໍາເປັນ. ນອກຈາກນັ້ນ, ເຄື່ອງມືຊ່ວຍເຫຼືອແລະ ບໍລິການເສີມທີ່ເໝາະສົມເພື່ອໃຫ້ຂໍ້ມູນໃນຮູບແບບທີ່ເຂົ້າເຖິງໄດ້ ໂດຍບໍ່ເສຍຄ່າໃຊ້ຈ່າຍ ແລະ ທັນເວລາ. ກະລຸນາໂທຫາເບີໂທລະສັບຂ້າງເທິງ ຫຼື ສົນທະນາກັບຜູ້ໃຫ້ບໍລິການຂອງທ່ານ. Lao

HUBADHAA: Yoo Afaan Oromoo dubbattu ta’e, tajaajila gargaarsa turjumaana afaanii biliisaan akkasumas turtii barbaachisaa hin taane hambisu danda’u isiniif dhihaatee jira. Dabalataanis, odeeffannoo haala salphaan argamuu danda’an dhiyeessuuf gargaarsa fi tajaajiloota deeggarsaa qama midhamtootaaf mijatoo ta’an, kaffaltii tokko malee fi yeroo isaa eeggatee kennamu dhihaatee jira. Odeeffanno dabalataaf lakkoofsa armaan oliitti fayyadamuun namoota gargaarsa kana isiniif kennan qunnamaa. Oromo

ВНИМАНИЕ: Если вы разговариваете на русском языке, воспользуйтесь услугами языковой поддержки бесплатно и без лишних проволочек. Также бесплатно и незамедлительно предоставляются соответствующие вспомогательные средства и услуги по обеспечению информацией в доступных форматах. Позвоните по указанному выше номеру или обратитесь к своему поставщику услуг. Russian

FIIRO GAAR AH: Haddii aad ku hadasho Soomaali, waxaa si bilaash ah kuugu diyaar ah adeegyada caawinada luuqadeed oo aan lahayn daahitaan aan munaasib ahayn. Intaas waxaa dheer, waxaa la heli karaa adeegyada iyo kaabitaanka naafada ee haboon si macluumaadka loogu bixiyo qaabab la adeegsan karo oo bilaash ah laguna bixinayo waqqigeeda. Fadlan wac lambarka kore ama la hadal adeegbixiyahaaga. Somali

ATENCIÓN: si habla español, tiene a su disposición los servicios gratuitos de traducción sin costo alguno y sin demoras innecesarias. Además, se encuentran disponibles de forma gratuita y oportuna ayuda y servicios auxiliares adecuados con el fin de brindarle información en formatos accesibles. Llame al número indicado anteriormente o hable con su proveedor. Spanish

LƯU Ý: Nếu bạn nói tiếng Việt, bạn có thể được hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí mà không phải chờ đợi lâu. Ngoài ra, các thiết bị hỗ trợ và dịch vụ phù hợp để cung cấp thông tin ở định dạng dễ tiếp cận cũng có sẵn miễn phí và kịp thời. Vui lòng gọi số điện thoại phía trên hoặc trao đổi với nhân viên y tế của bạn. Vietnamese

## Ogaysiiska Xuquuqda Madaniga ah

**Takoorku waxa uu ku lid yahay sharciga. South Country Health Alliance (South Country)** wax kuma takoorto qaabka ku salaysan waxyaabaha soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- caqiidada
- diinta
- qaabka galmada
- heerka caawimada dad waynaha
- da'da:
- naafanimada (ay ku jirto liidashada jidhka ama maskaxda)
- Jinsiga (ay ku jirto faalooyinka laga bixiyo jinsiga qofka iyo aqoonsiga sinjiga)
- xaalada guurka
- rumaynta siyaasadeed
- xaalada caafimaadka
- heerka caafimaadka
- helida adeegyada daryeelka caafimaadka
- waayo aragnimada sheegashada
- taariikhda caafimaadka
- macluumaadka hide sidaha

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada takoorka haddii aad rumaysan tahay inay kuula dhaqmay qaab takoor ah South Country. Waxaad soo xarayn kartaa cabasho oo waxaad waydiisan kartaa caawimada soo xaraynta cabashada qof ahaan ama boostada, telefoonka, fagaska, ama iimaylka xaga:

Civil Rights Coordinator
South Country Health Alliance
6380 West Frontage Road, Medford, MN 55049
Wicitaan bilaasha ah 866-567-7242 TTY: 800-627-3529 or 711 Fagas: 507-444-7774
iimaylka: grievances-appeals@mnscha.org

**Kaalmada Caawinta ah iyo Adeegyada: South Country** waxay bixisaa kaalmada caawinta iyo adeegyada, sida turjumaano takahasus leh ama macluumaadka qaabab la heli karo, bilaash ah iyo wakhti habboon si loo xaqiijiyo fursada loo siman yahay si looga qayb galo barnaamijyadayada daryeelka caafimaadka. **La xidhiidh** Xubinta Adeega members@mnscha.org ama soo wac 866-567-7242, TTY 800-627-3529 ama 711.

**Adeegyada Caawimada Luqaddda: South Country** waxay bixisaa dhokumenti turjumaan oo turjumaada luqadda lagu hadlo, oo bilaash ah iyo wakhti ku haboon, marka adeegyada caawimada luqadda ay lama huraan u yihiin si loo xaqiijiyo dadka kuhadlo Ingiriisiga xadidan inay si macno buuxda leh u heli karaan macluumaadkayaga iyo adeegyada. **La xidhiidh** Xubinta Adeega members@mnscha.org ama soo wac 866-567-7242, TTY 800-627-3529 ama 711.

### Cabashooyinka Xuquuqda Madaniga ah

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada takoorka haddii aad rumaysan tahay inay kuula dhaqmay qaab takoor ah South Country. Waxaad la xidhiidhi kartaa sidoo kale mid kasta oo ka mid ah wakaaladaha soo socda si toos ah si aad u soo xarayso cabashada takoorka.

**Waaxda Caafimaadka Iyo Adeegyada Aadamaha Maraykanka ee Xuquuqda Aadamaha (U.S. Department of Health and Human Services Office of Civil Rights) (OCR)**

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada OCR, wakaalada federaalka, haddii aad rumaysan tahay in lagu takooray sababtoo ah wax ka mid ah waxa soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- da'da:
- naafanimadooda
- sinjiga
- diinta (xaaladaha qaarkood)

Ula xidhiidh **OCR**si toos ah si aad u soo xarayso cabasho.:
Office for Civil Rights, U.S. Department of Health and Human Services
Midwest Region
233 N. Michigan Avenue, Suite 240 Chicago, IL 60601
Xarunta Jawaabta Macmiilka 800-368-1019, TTY: 800-537-7697
Iimaylka: ocrmail@hhs.gov

**Waaxda Xuquuqaha Aadamaha ah (Minnesota Department of Human Rights) (MDHR)**
Gudaha Minnesota, waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada MDHR, haddii lagu takooray sababtoo ah wax ka mid ah waxa soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- diinta
- caqiidada
- sinjiga
- qaabka galmada
- xaalada guurka
- heerka caawimada dad waynaha
- naafanimadooda

Ula xidhiidh **MDHR**si toos ah si aad u soo xarayso cabasho.:
Minnesota Department of Human Rights
540 Fairview Avenue North, Suite 201, St. Paul, MN 55104
651-539-1100 (codka), 800-657-3704 (wicitaanak bilaashka ah), 711 ama 800-627-3529 (MN Relay), 651-296-9042 (fagaska), Info.MDHR@state.mn.us (iimaylka)

**Waaxda Minnesota ee Adeegyada Aadamaha Minnesota (DHS)**
Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada DHS, haddii aad rumaysan tahay in lagu takooray barnaamijyadayada daryeelka caafimaadka sababtoo ah wax ka mid ah waxa soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- diinta (xaaladaha qaarkood)
- da'da:
- naafanimada (ay ku jirto liidashada jidhka ama maskaxda)
- Jinsiga (ay ku jirto faalooyinka laga bixiyo jinsiga qofka iyo aqoonsiga sinjiga)

Cabashooyinka waa inay qornaadaan oo lagu soo xareeyo gudaha 180 maalmood laga bilaabo taariikhda aad ogaatay takoorka la tuhunsan yahay. Cabashada waa inay ka koobnaataa magacaaga iyo cinwaanka oo faahfaahi takoorka aad ka cabanayso. Dib ayaanu u eegi doonaa oo waxaanu kugu wargelin doonaa wax ku saabsan haddii aanu oggolaanay inaanu baadho. Haddii aanu oggolaano, waanu baadhi doonaa cabashada.

DHS ayaa qoraal ahaan kugu wargelin doono natiijada baadhitaanka. Waxaad leedahay xaqa aad ku qaadato rafcaanka haddii aad khilaafto go'aanka. Si rafcaan aad u qaadato waa inaad codsi qoran u soo dirtaa inaad hesho dib u eegida DHS natiijada baadhitaanka. Soo koob oo sheeg sababta aad u diiday go'aanka. Ku dar macluumaad dheeraad ah oo aad u malaynayso inay muhiim tahay.

Haddii aad cabasho usoo xarayso qaabkan, dadka u shaqeeya wakaalada ee lagu magacaabay cabashada kaama aar goosan karaan. Tan macnaheedu waxa weeye kuma ciqaabi karaan adiga qaabnaba inaad soo xaraysay cabasho awgeed. Ku soo xaraynta cabashada qaabkan kaama joojiso adiga raadinta tallaabooyinka kale ee sharci ama maamul.

Ula xidhiidh **DHS**si toos ah si aad u soo gudbiso cabashada takroorka:

Civil Rights Coordinator
Minnesota Department of Human Services
Equal Opportunity and Access Division
P.O. Box 64997
St. Paul, MN 55164-0997
651-431-3040(cod) ama isticmaal adeega xidhiidhka dadka maqalka ka naafada ah

| |
|---|
| Hindida Maraykanka ah waxay sii wadi karaan ama bilaabi karaan isticmaalka adeegyada Qabiilka iyo rugaha Caafimaadka Hindida(IHS). Uma baahnaan doono oggolaanshe hore ama kuma soo rogno shuruudo adiga si aad uga hesho adeegyada rugahan. Dadka waayeelka ah ee 65 sanadood iyo ka wayn kuwan waxaa ku jira adeegyada ka Dhaafida Waayeelka ee lagu helo qabiilka. Haddii dhakhtarka ama adeeg bixiyaha kale ee qabiilka ama rugta IHS uu kuu gudbiyo adeeg bixiye ku jira shabakadaada, kaavama baahnaan doono adiga inaad aragto adeeg bixiya daryeelka koowaad ka hor gudbinta. |

## Hordhac

Dukumeentigani waa soo koobida ku saabsan faa'iidooyinka iyo adeegyada lagu bixiyo SeniorCare Complete. Waxaa ka mid ah jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo, macluumaadka xiriirka muhiimka ah, dulmar ku saabsan faa'iidooyinka iyo adeegyada la bixiyo, iyo macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada xubinka ee SeniorCare Complete. Erayada muhiimka ah iyo qeexitaankoodu waxay u soo baxayaan siday u kala horreeyeen alifbeetada cutubka u dambeeya ee *Buug-gacmeedka Xubinka*.

## Jadwalka Tusmooyinka


A. Afeefyo ........ 2

B. Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) ........ 3

C. Dulmarka Guud ee Adeegyada ........ 6

D. Adeegyada la daboolay ee ka baxsan SeniorCare Complete ........ 14

E. Adeegyada aan dabooli karin SeniorCare Complete, Medicare, ama Medical Assistance (Medicaid).... 14

F. Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga xubin ahaan ee qorshaha ........ 15

G. Maxaad sameyneysaa haddii aad rabto inaad gudbiso cabasho ama aad racfaan ka qaadato adeeg ama daroogo la diiday ........ 16

H. Maxaad sameen lahayd haddii aad ka shakiso khiyaano ........ 16

## A. Afeef

Soo koobidan adeegyada caafimaadka ee ay daboolayso SeniorCare Complete 1/1/2026. Tani waa soo koobid kaliya. Fadlan akhri *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u hesho liiska dheefaha oo dhan. Waxaad ka arki kartaa *Buug-gacmeedka Xubinka* boggeena www.mnscha.org. Haddii aad rabto nuqul daabacan, wac Adeegyada Xubinka ee SeniorCare Complete nambarka ku yaal boggan hoose.

- SeniorCare Complete(HMO SNP) waa qorshe caafimaad oo qandaraas kula jira barnaamijka Medicare iyo Minnesota Medical Assistance (Medicaid) si loo siiyo faa'idooyin labada barnaamij isdiiwaangeliyaasha. Diiwaangelinta SeniorCare Complete waxay ku xirantahay cusbooneysiinta qandaraaska.

- SeniorCare Complete (HMO D-SNP) waxaa loogu talagalay dadka da'doodu tahay 65 iyo wixii ka weyn ee ku nool aagga adeegga oo haysta labadaba Medicare Qaybta A iyo Qaybta B oo leh Caawin Caafimaad.

- Hoosta SeniorCare Complete waxaad ka heli kartaa Medicare iyo Adeegyada Caawinta Caafimaadka hal qorsho caafimaad. Iskuduwaha daryeelka SeniorCare Complete ayaa kaa caawin doona maaraynta baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.

- Macluumaadka ku saabsan adeegyada la-talinta doorashada, wac Waaxda Adeegga Aadanaha ee Minnesota ee Taageerada Macmiilka Daryeelka Caafimaadka (HCCS) khadka 1-651-297-3862 ama 1-800-657-3672.

- Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan **Medicare**, waxaad ka akhrin kartaa *Medicare & Adiga* buug-gacameedka. Waxay leedahay soo koobida faa'iidooyinka Medicare, xuquuqaha, iyo ilaalinta iyo jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo ee ku saabsan Medicare. Waxaad ka heli kartaa website-ka Medicare (www.medicare.gov) ama adigoo wacaya 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227), 24 saac maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Isticmaalayaasha TTY waa inay wacaan 1-877-486-2048.

- Waxaad wici kartaa Ombudsperson ee Barnaamijka Daryeelka Maamulka Dadweynaha 1-800-657-3729 ama 711 ama adeegga gudbinta ee aad doorbidayso, Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo - 4:30 galabnimo.

- Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa qaabab kale ah isagoo bilaash ah, sida farta waaweyn, farta indhoolaha, ama isagoo cod ah. Wac 1-866-567-7242, TTY 1-800-627-3529 ama 711, 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo, 7 maalmood usbuucii laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarso, iyo Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo Abriil ilaa Sebtembar.

- Si aad u samayso ama aad u bedesho codsiga joogtada ee aad ku helayso dukumeentigan, hadda iyo mustaqbalka, oo ku qoran luuqad aan Ingiriisi ahayn ama isagoo qaab kale u qoran, Adeegyada Xubinta ka wac lambarka ku qoran xagga hoose ee boggan.

## B. Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ)

Jadwalka soo socda ayaa taxaya su'aalaha inta badan la is weydiiyo.

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Waa maxay qorshaha Xulashada Caafimaadka Sare ee Minnesota (MSHO)?** | Qorshahayagu waa qayb ka mid ah Barnaamijka Xulashada Caafimaadka Sare ee Minnesota (MSHO). Barnaamijkan waxaa nashqadeeyey Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) si ay u siiso daryeel gaar ah waayeelka da'doodu tahay 65 iyo wixii ka weyn ee ku nool agagaarka adeegga. Qorshaheena waxa uu isku daray Medicare iyo Adeegyada Caawinta Caafimaadka. Waxay isku dartaa takhaatiirtaada, isbitaalka, daawooyinka laguu qoray, daryeelka guriga, daryeelka guriga kalkaalinta, iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka hal nidaam daryeel oo isku xiran. Waxa kale oo ay leedahay isku-duwayaasha daryeelka si ay kaaga caawiyaan inaad maamusho dhammaan adeeg bixiyaashaada iyo adeegyadaada. Dhammaantood way wada shaqeeyaan si ay kuu siiyaan daryeelka aad u baahan tahay.<br><br>Barnaamijkeena MSHO waxa loo yaqaan SeniorCare Complete. |
| **Miyaan heli doonaa isla faa'iidooyinka Medicare iyo Kaalmada Caafimaadka (Medicaid) fa'iidooyinka SeniorCare Complete ee aan hadda helo?** | Waxaad si toos ah uga heli doontaa inta badan faa'iidooyinka Medicare iyo Gargaarka Caafimaadka ee SeniorCare Complete. Waxaad la shaqayn doontaa koox bixiyeyaal ah kuwaas oo kaa caawin doona go'aaminta adeegyada sida ugu wanaagsan u dabooli doono baahiyahaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in qaar ka mid ah adeegyada aad hadda hesho ay isbeddeli karaan iyadoo lagu salaynayo baahiyahaaga, iyo qiimaynta dhakhtarkaaga iyo kooxda daryeelkaaga. Waxa kale oo aad ku heli kartaa faa'iidooyin kale oo ka baxsan qorshahaaga caafimaadka si la mid ah sida aad hadda u hesho, si toos ah meel kale, sida Gobolka, degmada, dawladda dhexe, ama qaranka Qabiilka.<br><br>Markaad iskadiiwaangeliso SeniorCare Complete, adiga iyo kooxdaada daryeelkaaga waxaad ka wada shaqayn doontaan sidii aad u samayn lahaydeen Qorshe daryeel ee Shakhsiyeed si wax looga qabto baahiyahaaga caafimaadka iyo taageerada, taasoo ka tarjumaysa dookhyadaada shakhsi ahaaneed.<br><br>Haddii aad qaadato dawooyinka Medicare Qaybta D ee aanay SeniorCare Complete caadi ahaan daboolin, waxaad heli kartaa sahay ku meel gaar ah waxaanan kaa caawin doonaa inaad u gudubto daawo kale ama aad hesho ka reeban SeniorCare Complete si ay u daboosho daawadaada haddii caafimaad ahaan loo baahdo. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Adeegyada Xubinka adoo ka wacaya lambarada ku qoran boggan hoose. |

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Ma isticmaali karaa isla dhakhaatiirta aan hadda isticmaalo?** | Tani inta badan waa kiis. Haddii bixiyayaashaada (ay ku jiraan dhakhaatiirta, isbitaallada, daaweeyaasha, farmashiyaasha, iyo bixiyaasha kale ee daryeelka caafimaadka) ay la shaqeeyaan SeniorCare Complete oo ay nala yeeshaan qandaraas, waad sii wadan kartaa inaad u tagto.<br><br>• Bixiyaasha heshiiska nala gala waa “waa shabakada dhaxdeeda.” Bixiyaasha shabakadu waxay ka qayb qaataan qorshaheena. Taas macnaheedu waa inay aqbaleen xubnaha qorshaheena oo ay bixiyaan adeegyo uu daboolo qorshaheena. **Waa inaad isticmaashaa bixiyaasha shabakadda SeniorCare Complete**. Haddii aad isticmaasho bixiyaasha ama farmashiyaasha aan ku jirin shabakadeena, shabakada ma bixinayso adeegyadan ama daawooyinka.<br><br>• Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah ama xaaladaha daryeelaka degdega ah ama adeegyada sifaynta ka baxsan aagga, waxaad isticmaali kartaa bixiyaasha ka baxsan qorshaha SeniorCare Complete. Waxa kale oo aad u isticmaali kartaa bixiyaasha shabakada ka baxsan **adeegyada gelitaanka fura** iyo xaaladaha SeniorCare Complete ay ogolaato isticmaalka bixiyaasha shabakadaha ka baxsan.<br><br>• Haddii aad hadda lagaa daweynayo bixiye ka baxsan shabakadda SeniorCare Complete, ama aad xiriir la leedahay bixiye ka baxsan shabakadda SeniorCare Complete, wac Adeegyada Xubinka si aad u hubiso inaad ku xiran tahay.<br><br>Si aad u ogaato in bixiyaashaada ay ku jiraan qorshaha shabakada, wac Adeegyada Xubinka nambarada ku taxan boggan hoose ama ka akhri Bixiyaha SeniorCare Complete*iyo Qaamuuska* Farmashiyaha website-keena www.mnscha.org.<br><br>Haddii SeniorCare Complete ay kugu cusub tahay, waxaanu kula shaqayn doonaa sidii aad u samayn lahayd qorshe daryeel si wax looga qabto baahiyahaaga. |

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Waa maxay isku-duwaha daryeelka dhamaystiran ee SeniorCare Complete?** | Isku-duwaha daryeelka dhammaystiran ee SeniorCare waa hal qof oo muhiim ah oo aad la xiriiri karto. Qofkani wuxuu kaa caawinayaa inaad maamusho dhammaan bixiyeyaashaada iyo adeegyadaada wuxuuna hubiyaa inaad hesho waxaad u baahan tahay, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:<br>● Kaa caawinaya inaad abaabusho, hesho, oo isku-dubariddo qiimeynta, baaritaanka, daryeelka caafimaadka, iyo taageerada muddada-dheer.<br>● La shaqayntaada si loo dejiyo loona cusboonaysiiyo qorshahaaga daryeelka.<br>● Kugu taageeraya iyo la xiriirka wakaaladaha iyo shakhsiyaadka kala duwan.<br>● Isku-dubaridka adeegyada kale ee lagu xusay qorshahaaga daryeelka. |
| **Waa maxay adeegyada iyo taageerada muddada-dheer?** | Adeegyada iyo taageerada muddada-dheer waa caawinaad loogu talagalay dadka u baahan gargaar si ay u qabtaan hawl maalmeedka sida qubayska, musqulaha, labiska, samaynta cuntada iyo qaadashada daawada. Inta badan adeegyadan waxaa lagu bixiyaa gurigaaga ama bulshadaada laakiin waxaa lagu bixin karaa guriga kalkaalinta ama isbitaalka. Xaaladaha qaarkood, degmo ama hay'ad kale ayaa laga yaabaa inay maamusho adeegyadan, oo isku-duwahaaga daryeelka ama kooxda daryeelka ayaa la shaqayn doona wakaaladdaas. |
| **Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo adeeg laakiin qof ka tirsan shabakadda SeniorCare Complete aan bixin karin?** | Inta badan adeegyada waxaa bixin doona bixiyaasha shabakadeena. Haddii aad u baahan tahay adeeg caymis ah oo aan lagu bixin karin shabakadeena, SeniorCare Complete ayaa bixin doonta kharashka bixiyaha shabakada ka baxsan. Oggolaansho hore ayaa loo baahan karaa ka hor inta aan adeegyada laga helin bixiyaasha shabakadaha aan ku jirin. |
| **Halkee laga helayaa SeniorCare Complete?** | Aagga adeegga ee qorshahaan waxaa ku jira degmooyinkaan Minnesota: Brown, Dodge, Goodhue, Sibley, Steele, Wabasha, iyo Waseca. Waa inaad ku nooshahay mid ka mid ah degmooyinkaan si aad ugu biirto qorshaha. Ka wac Adeegyada Xubinka nambarada ku taxan xagga hoose ee bogga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan haddii qorshaha laga heli karo meesha aad ku nooshahay. |

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Waa maxay oggolaanshaha hore?** | Oggolaanshaha hore macnaheedu waa ogolaanshaha SeniorCare Complete si aad u hesho adeegyo ka baxsan shabakadeena ama si aad u hesho adeegyo aanay si joogto ah u daboolin shabakadeena **ka hor** intaadan helin adeegyada. SeniorCare Complete ma daboosho adeega, nidaamka, shayga ama dawada haddii aadan helin ogolaansho hore.<br><br>**Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah ama xaalad daryeel oo degdeg ah ama adeegyada sifaynta meel ka baxsan, uma baahnid inaad oggolaansho hore hesho.** SeniorCare Complete waxay ku siin kartaa adiga ama bixiyahaaga liiska adeegyada ama nidaamyada lagaa doonaya SeniorCare Complete inaad ka hesho oggolaansho hore ka hor inta aan adeegga la bixin.<br><br>Tixraac **Cutubka 3**, ee *Buug-gacmeedka* Xubinka si aad wax badan uga ogaato oggolaanshaha hore. Tixraac jaantuska faa'iidooyinka ee **Cutubka 4** ee *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u ogaatid adeegyada u baahan oggolaansho hore.<br><br>Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan in oggolaansho hore looga baahan yahay adeegyo gaar ah, habraacyo, shay, ama daawo, wac Adeegyada Xubinka nambarrada ku qoran xagga hoose ee kan si aad caawimo u hesho. |
| **Miyaan bixiyaa qaddar bishii (sidoo kale loo yaqaan caymiska) xubin ahaan SeniorCare Complete?** | Maya. Sababtoo ah waxaad haysataa Gargaar Caafimaad, ma bixin doontid wax kharash ah bishiiba caymiska oo ay ku jirto lacagtaada Medicare Qaybta B, ee caymiska caafimaadkaaga. |
| **Miyaan bixiyaa wax laga jari karo xubin ahaan SeniorCare Complete?** | Maya. Ma bixinaysid wax lagaa jarayo ee SeniorCare Complete. |
| **Waa maxay lacagta ugu badan ee jeebka ka baxsan ee aan ku bixin doono adeegyada caafimaadka xubin ahaan SeniorCare Complete?** | Ma jiro wax la wadaago kharashka adeegyada caafimaadka ee SeniorCare Complete, markaa kharashyadaada jeebka ka baxsan ayaa noqon doona $0. |

## C. Liiska adeegyada la daboolo

Shaxda soo socotaa waa dulmar degdeg ah oo ku saabsan adeegyada aad u baahan karto, kharashyadaada, iyo xeerarka ku saabsan faa'iidooyinka.

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay daryeel isbitaal** | Joogitaanka isbitaalka ee bukaan-jiifka | $0 | Marka laga reebo xaalad degdeg ah, bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga waa inuu kuu sheegaa qorshaha gelitaanka isbitaalkaaga. |
| | Adeegyada bukaan-socodka, oo ay ku jiraan indho-indhayn | $0 | |
| | Adeegyada xarunta qalliinka ambalaaska (ASC) | $0 | |
| | Daryeelka dhakhtarka ama dhakhtarka qalliinka | $0 | |
| **Waxaad rabtaa dhakhtar** | Booqashooyinka lagu daweynayo dhaawac ama jirro | $0 | |
| | Daryeelida si aad uga ilaaliso inaad jirrato, sida tallaalada hargabka iyo baarista si loo hubiyo kansarka | $0 | |
| | Booqashooyinka fayoqabka, sida jirka | $0 | |
| | "Ku soo dhawoow Medicare" booqasho ka hortag ah (hal mar kaliya) | $0 | |
| | Daryeelka takhasuska leh | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay daryeel degdeg ah** | Adeegyada qolka degdega ah | $0 | Waxaad isticmaali kartaa qol kasta oo degdeg ah haddii aad si macquul ah u aaminsan tahay inaad u baahan tahay daryeel degdeg ah. Uma baahnid oggolaansho hore mana aha inaad ku jirto shabakad. Adeegyada qolka degdega ah LAGUMA daboolo meel ka baxsan Maraykanka iyo dhulalkiisa. Wixii faahfaahin ah kala xiriir qorshaha. |
| | Daryeelka Degdega ah | $0 | Daryeelka degdega ah ee loo baahan yahay maaha daryeel degdeg ah. Uma baahnid oggolaansho hore mana aha inaad ku jirto shabakad. Adeegyada qolka degdega ah LAGUMA daboolo meel ka baxsan U.S. iyo dhulalkiisa. Wixii faahfaahin ah kala xiriir qorshaha. |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay baaritaanno caafimaad** | Adeegyada raajada ogaanshaha (tusaale, raajada ama adeegyada sawir-qaadista, sida iskaanka CAT ama MRIs) | $0 | |
| | Baaritaannada shaybaarka iyo hababka daaweynta, sida shaqada dhiigga | $0 | |
| **Waxaad u baahan adeegyada maqalka/ dhageysiga** | Baaritaanka maqalka | $0 | |
| | Qalabka gargaarka maqalka | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay daryeelka ilkaha** | Baaritaanka ilkaha iyo daryeelka ka hortag | $0 | |
| | Soo celinta iyo daryeelka ilkaha degdega ah | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa.<br>Hal kabka ilkaha ah oo la sameeyo sanad kasta marka caafimaad ahaan muhiim tahay. |
| **Waxaad u baahan tahay daryeelka indhaha** | Baaritaanka indhaha | $0 | |
| | Muraayadaha ama muraayadaha indhaha | $0 | Xulashada waxaa laga yaabaa inay xaddidan tahay.<br>Mid ka mid ah muraayadaha ama muraayadaha indhaha ka dib qalliin kasta oo indhaha ah, ama muraayadaha indhaha ee xaaladaha qaarkood marka muraayadaha indhaha aysan shaqayn doonin.<br>Isku darka hagaajinta bikaacyada midabka leh, bikaacyada ookiyaalayaasha ee ku madoobaada iftiinka (tusaale ahaan Transitions®), bikaacyada ka hortagga dhalaalka, ama bikaacyada leh qeybaha kala duwan ee walxo masaafeedka ilaa ugu badnaan sanadlaha ah ee la isku daray. |
| | Daryeelka aragga kale | $0 | |
| **waxaad u baahan tahay Adeegyada Caafimaadka Dhimirka** | Adeegyada caafimaadka dhimirka | $0 | |
| | Daryeelka bukaan-jiifka iyo bukaan-socodka iyo adeegyada bulshada ku | $0 | |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| | salaysan ee dadka u baahan adeegyada caafimaadka dhimirka | | |
| **Waxaad u baahan tahay Adeegyada Xanuunada Isticmaalka Maandooriyaha** | Adeegyada Xanuunada Isticmaalka Maandooriyaha | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay meel aad kula noolaato dad diyaar u ah inay ku caawiyaan** | Nolol la habeeyey (adeegyada lagu bixiyo goob nololeed oo la caawiyay) | $0 | Shuruudaha u-qalmitaanka gobolka waa la dabaqi karaa. |
| | Daryeel kalkaaliye oo xirfad leh | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. Daryeelka kalkaalinta xirfadlaha caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah waa la daboolay. |
| | Daryeelka kalkaalisada guriga | $0 | |
| | Daryeelka korinta dadka waaweyn iyo kooxda daryeelka korinta dadka waaweyn | $0 | Shuruudaha u-qalmitaanka gobolka waa la dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay daawayn ka dib istaroog ama shil** | Daaweynta hadalka iyo, shaqada, jirka | $0 | Waxaa laga yaabaa inay xaddidan tahay daaweynta jireed, daaweynta shaqada, iyo adeegyada daaweynta hadalka. Hadday sidaas tahay, waxaa laga yaabaa inay jiraan waxyaabo ka reeban xuduudahan. |
| **Waxaad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka adeegyada caafimaadka** | Adeegyada Ambalaaska | $0 | Adeegyada ambalaasku waa inay caafimaad ahaan daruuri u noqdo. Uma baahnid oggolaansho hore oo loogu talagalay adeegyada ambalaaska mana aha inaad ku jirto shabakad. |
| | Gaadiidka degdega ah | $0 | |
| | Gaadiidka U socda oo Ka socda Adeegyada Caafimaadka | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa.<br>SeniorCare Complete loogama baahno inay ku siiso gaadiidka rugtaada daryeelka koowaad (PCC) haddii uu gurigaaga ay u jirto 30 mayl.<br>SeniorCare Complete loogama baahno inay ku siiso gaadiidka rugtaada |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| | | | daryeelka gaarka ah haddii uu gurigaaga ay u jirto 60 mayl. |
| | Gaadiidka adeegyada kale ee caafimaadka | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay daawooyin lagu daweeyo xanuunkaaga ama xaaladaada** | Daawooyinka Medicare Qaybta B | $0 | Dawooyinka Qaybta B waxaa ka mid ah dawooyinka uu takhtarkaagu kugu siiyo xafiiskooda, qaar ka mid ah daawooyinka kansarka afka, iyo daawooyinka qaarkood oo loo isticmaalo qalabka caafimaadka qaarkood. Akhri *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daawooyinkan.<br><br>Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Daawooyinka Qaybta D ee Medicare<br><br>Daawooyinka heerka 1-aad (magaca sumadeedka malaha)<br><br>Daawooyinka heerka 1-aad | Daawooyinka Heerka 1 aad: $0/$1.60/$5.10 ee sahayda 30-maalmood ah.<br><br>Daawooyinka Heerka 1 aad: $0/$4.90/$12.65 ee sahayda 30-maalmood ah<br><br>Lacag bixinta daawooyinka way kala duwanaan kartaa iyadoo ku saleysan heerka Caawimaada Dheeraadka ah ee aad hesho. Fadlan kala xiriir qorshaha wixii faahfaahin dheeraad ah. | Waxaa laga yaabaa inay jiraan xaddidaadyo ku saabsan noocyada dawooyinka la daboolay. Fadlan tixraac SeniorCare Complete *Liiska Daawooyinka la Daboolay* (*Liiska Dawooyinka*) wixii macluumaad dheeraad ah.<br><br>SeniorCare Complete ayaa laga yaabaa inay u baahato inaad marka hore isku daydo hal daawo si aad u daaweyso xaaladaada ka hor inta aysan daboolin daawo kale xaaladaas.<br><br>Daawooyinka qaar waxay leeyihiin tiro xadidan.<br><br>Bixiyahaagu waa inuu ka helaa ogolaansho hore SeniorCare Complete daawooyinka qaarkood.<br><br>Waa inaad u isticmaashaa farmashiyaha qaarkood tiro aad u kooban oo daawooyin ah, iyadoo ay ugu wacan tahay maaraynta gaarka ah, iskudubarid bixiyaasha, ama shuruudaha waxbarashada bukaanka oo aanay buuxin karin farmasiyada shabakadaada. Daawooyinkaan waxay ku qoran yihiin bogga qorshaha, *Liiska Daawooyinka la Daboolay* (*Liiska Dawooyinka*), iyo agabka daabacan, iyo sidoo kale |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| | | | Medicare Plan Finder ee www.medicare.gov.<br>Marka adiga ama dadka kale oo magacaaga ku hadlaya ay bixiyaan $2,100 waxaad gaartay heerkii caymiska masiibada waxaadna bixineysaa $0 dhammaan daawooyinkaaga Medicare. Akhri *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daawooyinkan.<br>Waxaa laga yaabaa inaad ka heli karto dawooyinka qaarkood sahayda fidsan ee farmashiyaha. Wadaagista kharashka sahayda la dheereeyey waxay la mid tahay sahayda halka bil ah. |
| | Daawooyinka laga iibsan karo (OTC). | $0 | Waxaa laga yaabaa inay jiraan xaddidaadyo ku saabsan noocyada dawooyinka la daboolay. Fadlan tixraac SeniorCare Complete *Liiska Daawooyinka la Daboolay* (*Liiska Dawooyinka)* wixii macluumaad dheeraad ah. |
| **Waxaad u baahan tahay in lagaa caawiyo sidii aad u fiicnaan lahayd ama aad leedahay baahiyo caafimaad oo gaar ah** | Adeegyada Baxnaaninta | $0 | Adeegyada baxnaaninta caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waa la daboolay. |
| | Qalabka caafimaadka ee daryeelka guriga | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Adeegyada Sifeynta | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay daryeelka cagaha** | Adeegyada lugaha | $0 | Booqashooyinka lugaha ayaa loogu talagalay daryeelka cagaha caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. |
| | Adeegyada lafaha | $0 | Adeegyada la daboolay: |
| **Waxaad u baahan tahay qalab caafimaad oo waara (DME) ama sahay**<br>**Xusuusin:** Kani maaha liis dhamaystiran oo DME ah oo la daboolay. Si aad u hesho liis dhamaystiran wac | Kursiga curyaanka, ulaha , iyo lugaha | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Nebulizers | $0 | |
| | Qalabka ogsijiinka iyo sahayda | $0 | |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| Adeegyada Xubinka ama eeg **Cutubka 4** ee *Buug-gacmeedka Xubinta*. | | | |
| **Waxaad u baahan tahay caawimo ku noolaanshaha guriga** | Daryeelka guriga | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Caawinta Daryeelka Shakhsiga | $0 | |
| | Isbeddellada ku yimaadda gurigaaga, sida meelaha la fuulo iyo kursiga curyaanka | $0 | |
| | Adeegyada guriga, sida nadaafadda ama ilaalinta guriga | $0 | |
| | Cuntada gurigaaga laguugu keenay | $0 | |
| | Adeegyada maalinta dadka waaweyn ama taageerooyinka kale | $0 | |
| | Adeegyada kaa caawinaya inaad keligaa noolaato | $0 | |
| **Your caregiver needs some time off** | Daryeelka nasashada | $0 | Shuruudaha u-qalmitaanka gobolka waa la dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay Adeegyada turjubaanka** | Turjubaanka luuqadda lagu hadlo | $0 | |
| | Turjubaanka luuqadda dhagoolada | $0 | |
| **Adeegyada dheeraadka ah** | Toobinta | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Iskuduwidda Daryeelka | $0 | Waxa kale oo laguu qori doonaa isku-duwaha daryeelka.<br>si uu kaaga caawiyo isku xirka bixiyaasha, helitaanka ilaha bulshada ee jira, iyo kaa caawinta inaad hesho adeegyada aad u baahan tahay. |
| | Adeegyada Jir duugista | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| | Sahayda iyo adeegyada sonkorowga | $0 | Sahayda iyo adeegyada sonkorowga waxay ku xaddidan yihiin soosaarayaal gaar ah, badeecooyin iyo/ama noocyo marka laga helo farmashiyaha. Kala xiriir Adeegyada Xubinka liiska agabka la daboolay ama booqo mareegaheena **www.mnscha.org**. |
| | Qorshaynta Qoyska | $0 | |
| | Adeegyaha lugaha la sameeyey | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | daaweynta shucaaca | $0 | |
| | Adeegyada kaa caawinaya maaraynta cudurkaaga | $0 | |
| | Cunooyinka guriga lagu bixiyo: | $0 | Ilaa 140 cunto (1 cunto maalintii ilaa 7 toddobaad muddo 10 asbuuc ah) ka dib marka bukaan jiifka laga saaro. Ugu badnaan 2 jeer isbuucii.<br><br>Waxa kaliya oo loo heli karaa cuntooyinka aan hore u daboolin faa'iido kale ama barnaamij caymiska. |
| | Qalabka badbaadada guriga ama wax ka beddelka iyo agabka | $0 | Qalabka guriga iyo badqabka iyo waxka badelka ee horumariya caafimaadka ama nolol badqab leh oo madax banaan sida biraha la qabsado, qubeyska ama kuraasta qubeyska, biraha gacanta, saliga ka hortaga in qof ku siibto, kuraasta curyaanka ku meel gaarka ah iyo kuraasta wiishka. Kaliya alaabta ama adeegyada aan la daboolin ka dhaafida, ilaa ugu badnaan $1000 sanadkii. La xiriir Isuduwaha Daryeelkaaga si aad u hesho caawimaad ku saabsan helitaanka faa'iidadan. |
| | Nidaamka digniinta caafimaadka ee PERS | $0 | Xubnaha xaqa u leh waxaa ka mid ah ka tanaasulid la'aan ama kaliya haddii adeegga EW xubin uu gaaro xadka miisaaniyada. |
| | Kaarka daawada Dhakhtarka la'aanta lasoo gato (OTC) | $0 | Xubnaha hadda waxay heli doonaan kaarka OTC oo leh $90 qaddar kharash ah saddexdii biloodba mar. Lacagaha waa in la kharash gareeyaa dhammaadka rubuca oo ha u gudbin |

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashkaaga loogu talagalay Bixiyeyaasha shabakadda | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| | | | rubuca xiga. Lacagtu waxay cusboonaysiisaa rubuc kasta ilaa inta isticmaaluhu uu ka sii ahaanayo xubinka qorshaha. Qarashka ugu badan sannadkii waa $360. |
| **Fayoqabka Waxbarashada** | Caawinta JoojintaTubaakada | $0 | Xubnaha waxay heli karaan caawimaad taleefoon ah iyo mid onleen ah iyo waxbarasho oo lacag la'aan ah. |
| | Naadiga caafimaadka / dhimista jirdhiska | $0 | Hel qiimo dhimis ilaa $40 bishiiba xubinimada caafimaadka ee ka qayb qaadanaya |
| | Dhimista Waxbarashada Bulshada | $0 | Waxay dabooshaa ilaa $15 ee kharashka inta badan fasalada Waxbarashada Bulshada (ilaa 5 sanad dugsiyeedkii) |

Soo koobida kor ku xusan ee faa'iidooyinka waxa loo bixiyay ujeeddooyin macluumaad oo keliya mana aha liis dhammaystiran oo dheefo ah. Si aad u hesho liis dhamaystiran iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dheefahaaga, waxaad akhrin kartaa *Buug-gacmeedka Xubinta* SeniorCare Complete. Haddii aadan haysan *Buug-gacmeedka Xubinka*, wac Adeegyada Xubnaha SeniorCare Complete 1-866-567-7242 (TTY 1-800-627-3529 ama 711) si aad mid u hesho. Haddii aad hayso su'aalo, waxaad sidoo kale wici kartaa Adeegyada Xubinta ama booqo www.mnscha.org.

## D. Faa'iidooyinka lagu daboolay meel ka baxsan SeniorCare Complete

Waxa jira adeegyo aad heli karto oo aanay daboolin SeniorCare Complete laakiin ay ku jiraan Medicare, Caawimada Caafimaadka, ama Hay'ad Gobol ama degmo. Tani ma aha liis dhammaystiran. Ka wac Adeegyada Xubinka adoo ka wacaya lambarrada ku taxan xagga hoose ee boggan si aad u ogaato adeegyadan.

| Adeegyada kale ee ay daboolaan Medicare, Gargaarka Caafimaadka ama Wakaaladda Gobolka | Kharashka aga |
|---|---|
| Qaar ka mid ah adeegyada daryeelka hospice ee laga bixiyo meel ka baxsan SeniorCare Complete | $0 |
| Marka laga reebo adeegyada Waayeelka, adeegyada kale ee dhaafitaanka ayaa la bixiyaa | $0 |

## E. Adeegyada SeniorCare Complete, Medicare, iyo Caawinaada Caafimaadka aanay daboolin

Tani ma aha liis dhammaystiran. Ka wac Adeegyada Xubinka adoo ka wacaya lambarrada ku taxan xagga hoose ee boggan si aad u ogaato adeegyadan la reebay.

**Adeegyada SeniorCare Complete, Medicare, iyo Caawinaada Caafimaadka aanay daboolin**

- Adeegyada looma tixgeliyo "macquul iyo lama huraan" marka loo eego heerarka Medicare iyo Caawinta Caafimaadka
- Tijaabada daaweynta iyo daaweynta qalliinka, shay, ama dawooyin ilaa uu daboolo Medicare ama hoos yimaad daraasad caafimaad oo Medicare ay oggolaatay mooyaane
- Daawaynta qaliinka ee buurnaanta jirrada marka laga reebo marka loo baahdo caafimaad ahaan
- Nidaamyada kobcinta doorashada ama ikhtiyaariga ah
- Qalliinka isqurxinta ama shaqada kale ee qurxinta haddii aan la buuxin shuruudaha
- Qalliinka Lasik

---

## F. Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga xubin ahaan ee qorshaha

Xubin ka mid ah SeniorCare Complete, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah. Waxaad isticmaali kartaa xuquuqahan adiga oo aan lagu ciqaabin. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa xuquuqahan adoon lumin adeegyadaada daryeelka caafimaadka. Waxaan kuu sheegi doonaa waxa ku saabsan xuquuqdaada ugu yaraan hal mar sannadkii. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, fadlan akhri *Buug-gacmeedka Xubinka*. Xuquuqdaada waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, kuwan soo socda:

- Waxaad xaq u leedahay heshmad, xaqsoor iyo karaamo. Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Hel adeegyo caymis welwel la'aan oo ku saabsan xaalad caafimaad, heerka caafimaadka, helitaanka adeegyada caafimaadka, khibrad sheegashada, taariikhda caafimaadka, naafanimada (oo ay ku jiraan itaaldarrada maskaxda), xaaladda guurka, da'da, jinsiga (oo ay ku jiraan fikradaha galmada iyo aqoonsiga jinsiga), jihada galmada, asal qaran, isir, midab, diin, caqiido, ama kaalmada dadweynaha
  - Hel macluumaadka luqado kale iyo qaabab (tusaale, farta waaweyn, farta indhoolaha, ama maqal) bilaash ah
  - Ka xorow nooc kasta oo ka mid ah xakamaynta jirka ama gooni-u-fadhiga
- **Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga caafimaad.** Tan waxa ku jira macluumaadka ku saabsan daawaynta iyo daawayntaada. Macluumaadkani waa inuu ahaadaa luuqad iyo qaab aad fahmi karto. Tani waxaa ka mid ah xaqa aad u leedahay in macluumaad aad ka hasho:
  - Sharaxaada adeegyada aanu daboolno
  - Sida adeegyada loo helo
  - Immisa adeeg ayaa kugu kici doonta
  - Magacyada bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo isku-duwaha daryeelka
- Waxaad xaq u leedahay inaad go'aan ka gaarto daryeelkaaga, oo ay ku jirto diidmada daaweynta. Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Dooro bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) oo beddel bixiyaha xanaanada aasaasiga ah wakhti kasta inta lagu jiro sanadka
  - Isticmaal bixiyaha daryeelka caafimaadka haweenka iyada oo aan la soo gudbinin
  - Si degdeg ah u hel adeegyadaada la bixiyo iyo daawooyinka
  - Ogow dhammaan xulashooyinka daawaynta, iyada oo aan loo eegin waxa ay ku kacayaan ama haddii ay caymis yihiin
  - Diid daaweynta, xitaa haddii bixiyaha xanaanada caafimaadkaagu kugula taliyo diidmo

- Jooji qaadhashada daawada, xitaa haddii bixiyaha xanaanada caafimaadkaagu kugula taliyo diidmo
- Weydiiso ra'yi labaad. SeniorCare Complete ayaa bixin doonta kharashka booqashada ra'yigaaga labaad
- Ku sheeg rabitaannadaada daryeelka caafimaadka dardaaranka hore

- Waxaad xaq u leedahay in wakhti ku haboon aad hesho daryeel aan lahayn wax isgaarsiin ah ama caqabado gelitaanka jirka. Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Hel daryeel caafimaad oo ku habboon
  - Soo gal oo ka bax xafiiska bixiyaha xanaanada caafimaadka. Tani waxay ka dhigan tahay gelitaanka bilaa caqabada ah ee dadka naafada ah, si waafaqsan Xeerka Naafada Ameerika
  - Hayso turjubaano kaa caawiya xiriirika bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo qorshahaaga caafimaad
- Waxaad xaq u leedahay inaad raadsato daryeel degdeg oo degdeg ah markaad u baahan tahay. Tani waxay ka dhigan tahay inaad xaq u leedahay:
  - Hel adeegyada degdegga ah iyada oo aan oggolaansho hore laga helin xaalad degdeg ah
  - Isticmaal bixiye daryeel degdeg ah oo ka baxsan shabakada, marka loo baahdo
- Waxaad xaq u leedahay qarsoodi iyo sir. Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Weydiiso oo hel nuqul ka mid ah diiwaannadaada caafimaadka si aad u fahmi karto oo aad u codsato in diiwaannadaada la beddelo ama la saxo.
  - Xogtaada caafimaad ha ahaato mid sir ah
  - Qarso inta lagu jiro daawaynta
- Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho ka samayso adeegyadaada ama daryeelkaaga la daboolay. Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Soo gudbi cabasho ama cabasho ka dhan anaga ama bixiyaasheena
  - Weydiiso Racfaan Goboleed (Dhageysiga Cadaalada ee Medicaid ee Gobolka)
  - Hel sabab faahfaahsan sababta adeegyada loo diiday

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, waxaad akhrin kartaa *Buug-gacmeedka Xubinka*. Haddii aad qabto su'aalo, waxaad wici kartaa Adeegyada Xubinka ee SeniorCare Complete nambarada ku qoran boggan hoose.

Waxaad sidoo kale wici kartaa Xafiiska Ombudsperson ee Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Maamulka Dadweynaha lambarka 1-800-657-3729 (TTY: 711 ama isticmaal adeegga gudbinta ee aad doorbidayso). Wicitaanka waa lacag la'aan.

## G. Sida loo xareeyo cabasho ama rafcaan loogu qaato adeeg la diiday

Haddii aad qabto cabasho ama aad u malaynayso in SeniorCare Complete ay tahay inay daboosho wax aanu diidnay, wac Adeegyada Xubinka nambarada ku qoran boggan hoose. Waxaa laga yaabaa inaad racfaan ka qaadan karto go'aankeena.

Wixii Su'aalo ah oo ku saabsan cabashooyinka iyo rafcaannada, waxaad akhrin kartaa **Cutubka 9** ee *Buug-gacmeedka Xubinta*. Sidoo kale waxaad wici kartaa Adeegyada Xubinka adoo ka wacaya lambarada ku qoran boggan hoose.

Waxaad sidoo kale noo soo qori kartaa. Fadlan u soo dir:

SeniorCare Complete
South Country Health Alliance

Fiiro: Waaxda Racfaanada iyo Gudbinta Cabashada
6380 West Frontage Road, Medford, MN 55049

## H. Maxaad sameen lahayd haddii aad ka shakiso khiyaano

Inta badan xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo ururada bixiya adeegyada waa daacad. Nasiib darro, waxaa jiri kara qaar aan daacad ahayn.

Haddii aad u malaynayso in dhakhtar, isbitaal, ama farmashiye kale uu sameynayo wax khaldan, fadlan nala soo xiriir.

- Naga soo wac Adeegyada Xubinka SeniorCare Complete ee nambarada ku taxan xagga hoose ee boggan.
- Ama, wac Khadka Tooska ah ee Khiyaanada ee SeniorCare Complete 1-877-778-5463.
- Ama, wac Khadka Tooska ah ee Barnaamijka Minnesota Integrity Oversite 651-431-2650 ama 1-800-657-3750. Isticmaalayaasha TTY waxay wici karaan 711. Wicitaanka waa lacag la'aan.
- Ama, ka wac Medicare 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227). Isticmaalayaasha TTY waxay wici karan 1-877-486-2048. Waxaad wici kartaa nambaradan bilaashka ah, 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii.

**Haddii aad qabto su'aalo guud ama su'aalo ku saabsan qorshaheena, adeegyada, goobta adeegga, biilasha, ama Kaararka Aqoonsiga Xubinka, fadlan wac Adeegyada Xubinka SeniorCare Complete:**

## WAC 1-866-567-7242

Wicitaanka waa lacag la'aan. 8 subaxnimo ilaa 8 habeenkii, 7 maalmood usbuucii laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarso, iyo Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo Abriil ilaa Sebtembar.

Adeegyada Xubnuhu waxa kale oo ay leeyihiin adeegyo turjumaan luqadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlin.

## TTY/Adeegga Gudbinta 1-800-627-3529 ama 711

Wicitaanka waa bilaash. 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo, 7 maalmood usbuucii laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarso, iyo Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo Abriil ilaa Sebtembar.

## Haddii aad su'aalo ka qabto caafimaadkaaga:

- Waxaad bedeli kartaa rugtaada daryeelka aasaasiga ah (PCC) haddii ay furantahay. Raac tilmaamaha PCC-gaaga si aad u hesho daryeelka marka xafiiska la xiro.
- Haddii xafiiska PCC-gaagu xiran yahay, waxaad sidoo kale wici kartaa **Khadka talobixinta kalkaalisada 24-saac**. Adeegan waxtarka leh waxaa ka shaqeeya kalkaaliyayaal khibrad leh oo diiwaangashan oo ka jawaabi kara su'aalahaaga caafimaadka. Waxay kaa caawin karaan inaad go'aan ka gaarto waxaad sameyn laheyd markaad jiran tahay ama dhaawacan tahay, waxaana la heli karaa 24 saacadood maalintii, 7 maalmood asbuucii. Soo wac lambarka ku yaal gadaasha kaarkaaga aqoonsiga xubinta. Wicitaanada nambarkan waa bilaash. Adeegyada Xubnuhu waxa kale oo ay leeyihiin adeegyo turjumaan luqadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlin.
- Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah, waxaad kala xiriiri kartaa Doctor on Demand™ website-ka doctorondemand.com ama abka mobaylka. Hayso aqoonsiga xubintaada. Waxaad u baahan doontaa inaad sameeysato akoon bilaash ah. Looma baahna kaarka deynta Dhakhaatiirta ayaa la heli karaa 24/7/365 in ka yar 5 daqiiqo.

**Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan wac Khadka Khalkhalka Caafimaadka Maskaxda ee Minnesota 988**

Waxaa kale aad Wici kartaa nambarka hoose ee degmada aad ku nooshahay. Wicitaanada nambaradaan waa bilaash.

Wicitaannada waxaa laga jawaabaa 24 saac maalintii, 7 maalmood todobaadkii.

Waxa kale oo ay hayaan adeegyo turjumaan luqadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlin.

**Brown** 1-877-399-3040

**Dodge** 1-844-274-7472

**Goodhue** 1-844-274-7472

**Sibley** 1-877-399-3040

**Steele** 1-844-274-7472

**Wabasha** 1-844-274-7472

**Waseca** 1-844-274-7472